The Royal Women's Hospital Women's Health Information

Ku daaweynta Endometriosis qaliinka Laparoscopy

Maarso, 2004

Maxaan u sameynayaa qaliinka Laparoscopy?

Dakhtarkaagu wuxuu ka shakisan yahay inaad qabto endometriosis wuxuuna ku siiyey fursada ah in lagugu sameeyo laparoscopy.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad ka ogaato macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan endometriosis iyo doorashooyinka aad haysato ee ku saabsan daaweyntaada, fadlan eeg waraaqaha xaqiiqda ee *Endometriosis –macluumaadka loogu talagalay dumarka iyo daaweynta Endometriosis*.

Faa'iidada laparoscopy waxaa weeye in wiisatadaada la xaqiijin karo islamarkaana daaweynta la sameeyo. Faa'iidada laparoscopy waxaa weeye waxaa loo isticmaali karaa in lagu ogaado meesha endometriosis uu joogo iyo in intee le'eg ayaa halkaas ka joogta, iyo sidoo kale in la hubiyo inuusan jirin dhibaato caafimaad oo kale oo sababeysa astaamahaagan.

Waa maxay Laparoscopy?

Waa qaliin la gelinayo weyneeso yar xuduntaada si loo arko uurku jirta calooshaada iyo lafaha miskahaaga. Meelo yar yar oo badan in laga gelinayo ayaa lagama maarmaan ah si qalab kale loo isticmaalo si loo sameeyo nidaamkan. Meelaha wax lagaa gelinayo waxaa lagu xirayaa hal toliin ama koolada xirida.

Sidee loo isticmaalaa?

haddii endometriosis la arki karo inta la sameynayo qaliinkan, waxaa badanaa laga soo qaadayaa saami la baaro. Tanina waxay xaqiijinaysaa wiisatada.

Daaweyntu waxay ku xiran tahay meesha laga helo iyo inta laga heloba.

Dhibco ah endometriosis oo ku yaal dhammaan lafaha miskaha qaliin ahaan ayaa loo goynayaa ama se gubitaan (iyadoo la isticmaalayo diathermy ama laysar). Endometriosis ku jira ugxan sidaha badanaa wuxuu u baahan yahay goynta cyst, oo la yiraahdo an endometriotic cyst (endometrioma).

Mar marka qaarkood endometriosis waxay saameysaa unugyada kale sida caloosha ama tuunbada kaadida (tuumbada kelida iyo kaadi haysta isku xirta). Haddii ay arintu sidan tahay, waxaa laga yaabaa inaad u baahato qaliin dheeraad ah wakhti kale. Qaliin dheeraad ah waxaa laga yaabaa inay ku lahaadaan dhakhaatiir takhasus qaliin oo kale.

Keebaa wanaagsan laysarka – ama diathermy?

Laysarka iyo diathermy waa qalab uu dhakhtarku isticmaali karo si uu u kululeeyo unuga. Labadaba waa loo isticmaali karaa in lagu qubo endometriosis (ablation) ama lagu jaro. Labadan haba waxay leeyihiin faa'iidooyin iyo faa'iido daraba. Dhakhtarka dumarka ayaa isticmaali doona habka ay khibrada ugu badan u leeyihiin ama ay ku wanaagsan yihiin.

Gubida ama jarida

Waxaan hadda ku sameynaynaa daraasad Isbitaalka Dumarka ee Royal si aan u ogaano ka ah daaweynta ugu waxku oolsan. Meelaha qaarkood inkastoo, jarida ay u muuqato inay ka fiican tahay sida kale.

Khataraha

dhammaan qaliinadu waxay leeyihiin khataro. qaliinka laparoscopy,dhibaatadu waa dhif laakiinse waxay noqon kartaa mid daran.. Waxaa ku jira:

- Infekshin gala kaadi haysta, tuunbada kaadida qaada ama meelaha laga gooyo uurku jirta
- Unug wax noqda ama dhiigid – (mid shantii boqol ee qofba)
- dhimasho – (mid labaantankii kun ee qof).

Khataraha khaaska ah ee ay leedahay daaweynta endometriosis lagu daaweeyo qaliinka laparoscopy waxaa ka mid ah:

- caloosha oo wax la gaarsiiyo
- kaadi haysta ama tuunbada kaadida qaada oo wax la gaarsiiyo

dhibaatadan waxaa laga yaabaa inay u baahato daaweyn degdeg ah. Waxay noqon karaan Qatar waxaana laga yaabaa inay u baahato qaliin dheeraada wakhti danbe.

Khataraha kale waxaa ka mid ah:

- suurto galnimada inaysan astaamuhu sii korin,
- sameynta nabar (isku dhejin) formation.

Xaaladaha qaarkood waxaa laga yaabaa inaysan suurto gal ahayn in la gooyo dhammaan endometriosis ama waxaa laga yaabaa inuu endometriosis wakhti dambe soo noqdo.

Qaliinka ka hor dhakhtarkaagu waa inuu kaala hadlaa khataraha si markaad ogolaato qaliinka aad u fahamto waxa khataruhu yihiin.

Haka baqan inaad su'aalo weydiiso

Diyaarinta caloosha

Diyaarinta caloosha waxaa laga yaabaa inay siiso dhakhtarka aragti fiican oo ku saabsan lafaha miskahaaga inta qaliinku socdo (iyo inay ka dhigto qaliinka wax sahlan). mid saddexdii kun ee dumar ahba waxaa ku dhacaya dhaawac calooleed kadis ahaan ku dhaca inta qaliinkan la sameynayo. Hore u diyaarinta caloosha waxay ka dhigeysaa ka bitaanka caloosha wax sahlan oo ammaan leh.

Ma lagu daaweyn karaa dhammaan endometriosis qaliinkan?

Maya! Gaar ahaan endometriosis daran ama markay joogto meel gaar ah (tusaale meel u dhow caloosha ama tuunbada kaadida qaada) qaliin dheeraad ah ayaa laga yaabaa in loo baahdo. A laparoscopy wuxuu caawin doonaa dhakhaatiirtu inay ka ogaadaan wax badan oo ku saabsan xaaladaada ka dibna qaliin dheeraad ah ayaa si habsami leh oo qorsheyn karaa.

Haddii aad u baahan tahay qaliin dheeraad waxaa laga yaabaa inuu noqdo qaliin lagu jeexayo ee uusan ahayn midka meel lagaa daloolinayo (laparoscopy).

Endometriosis oo ku lug leh caloosha

Haddii aysan jirin wax astaamo daaweynta waxaa laga yaabaa inaan loo baahan. Haddii astaamaha calooshu ay yihiin wax la arki kara, waxaa laga yaabaa in qayb ka mid ah caloosha la qooyo. Tan waxaa lagu sameyn karaa mar marka qaarkood iyadoo la isticmaalayo qaliinka laparoscopy, laakiinse badanaa waxay u baahan tahay in lagu sameeyo qaliin la jeexayo. Haddii arintu sidan tahay waxaa lagu yaabaa in laga soo qayb geliyo dhakhtarka qaliinka caloosha ku takhasusay.

Hagaajinta astaamaha

Xaaladaha badidooda waa la hagaajiyaa, badanaa ilaa wakhti badan. Xaaladaha qaarkood meeshay astaamuhu ayna ahayn endometriosis awgood ama meeshaysan suurto gal ahayn in dhammaan si buuxda loo gooyo, astaamaha waxaa laga yaabaa in qayb ahaan la hagaajiyo. Mar marka qaarkood inkastoo aan gebi ahaanba la hagaajin karin.

Hagaajinta ilmo qaadista

Dumarka qaba endometriosis dudud, ee isku dayeyey inay uur qaadaan, bacrimintoodu waxaa laga yaabaa in la hagaajiyo xilliga qaliinka ka danbeeya. Dumarka aan isku deyin inay uur qaadaan qaliinka ka hor saameynta qaliinku uu ku yeelanayo uur qaadistooda lama yaqaan.

Qaliinkani ma iga daaweynayaa dhammaan endometriosis weligey?

Baaritaan daraasadeed ee sheegaya in muddo shan sanno ah ,ilaa 70% dumar ahi wax cadeyn ah ma heli doonaan oo sheegaya soo noqoshada endometriosis.

Meesha aad ka heli karto macluumaad dheeraad ah

Xarunta Macluumaadka Caafimaadka Dumarka (RWH)
(03) 8345 3045
1800 442 007 (wicitaan bilaash ah) Email: whic@thewomens.org.au
http://www.thewomens.org.au

Endometriosis Association of Victoria
567 Waterdale Road
Heidelberg West
Victoria 3081
Australia
(03) 9457 2933
http://www.endometriosis.org.au/

Rugta Caafimaadka Dumarka ee Isbitaalka Dumarka ee Royal
Rugta caafimaadku waxay ku taalaa waaxda bukaan socodka ee dabaqa hoose ee Isbitaalka Dumarka ee Royal
Teleefan 8345 2000

Waraaqaha xaqiiqda RWH ee aad faa'iido ka heli karto

RWH waxay hayaan waraaqo xaqiiqeed fara badan oo afaf badan ku qoran interneetkana ku jira. Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah waxaad geli kartaa website – kayaga xayeysiinta caafimaadka . cinwaanku waa http://www.thewomens.org.au

Waxaad sidoo kale weydiin kartaa xannaaneeyahaaga Isbitaalka Dumarka ee Royal inuu ku siiyo nuqul daabacan oo ah waraaqdaas xaqiiqda. Weydiiso:

- *Endometriosis –macluumaadka loogu talagalay dumarka*
- *Daaweynta Endometriosis*